



Federal Republic of Somalia  
Office of the President

SHARCI LR. 25

TAARIKH 24/06/2014

OGGOLAANSHO ANSIXINTA SHARCIGA BANKIGA HORUMARINTA IYO DIB U DHISKA EE SOOMAALIYA

**MADAXWEYNAHA J.F.S.**

**Markuu Arkay:** Qodobada 87, Xarafka 'C' iyo Faqradda 2aad iyp Qodobka 90aad Xarfka "F" ee Dastuurka J.F.S.

**Markuu Arkay:** Warqadda Ansaxinta Golaha Shacabka Lr.265/3/1/14 ee 14/06/2014

**Markuu Tixgaliyay:** Ina ay muhiim tahay in dib loo hawlgeliyo Hay'adaha Dowladda gaar ahaan kuwa Dhaqaalaha iyo Maaliyadda

**Wuxuu soo saaray Xeerkaan:**

**Qodobka 1aad.**


Laga billaabo marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo Sharcigaan, waxaa la oggolaaday Sharciga lagu dhisaayo Banikiga Horumarinta iyo Dib u Dhiska ee Soomaaliya

**Qodobka 2aad**

Waxa uu Xeerkan dhaqangelayaa isla marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed saxiixo waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO 24/06/2014

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD WAA LA DIWAAN GELIYEEY
DIWAAN NO. HAN/027/2014
TAARIKH 24/06/2014
SAXIIXA NC. [Signature]



**Madaxweynaha J. F. S.**  
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**



Federal Republic of Somalia  
House of the People  
Office of the Speaker

Ref: 265/3/1/14: البرقم:

Mogadishu, June 14, 2014 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya  
Muqdisho.

Og: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda  
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.  
Muqdisho.

Og: Hantidhowraha Dawladda  
Muqdisho.

Ujeedo: Ansixinta Sharciga Bankiga Horumarinta iyo Dib-u-dhiska.

M.ne Madaxweyne;

Waxaan kuugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Bankiga Horumarinta iyo Dib-u-dhiska oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka fadhigiisii 35aad ee Kalfadhiga 4aad taariikhda markay aheyd Juun 10, 2014 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jamhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 141 (Boqol Affartan iyo Kow).
- Xildhibaan diidey: 2 (Laba).
- Xildhibaan ka aamustay: 3 (Seddex).

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharcigan u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaam diiran iyo oodhahin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"  
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



MJ/AM



**ANSIXINTA SHARCIGA BANKIGA HORUMARINTA  
IYO DIB-U-DHISKA**

**Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS**

Tirada Xubnaha Codeysay 146: Oggol (141)- Diidmo (2 )- ka aamustay (3)

Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"



Taariikh: Juun 14, 2014

**Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS**

Saxiix: M. ne Jeylaani Nuur Iikar

Taariikh: Juun 14, 2014

**Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS**

Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad



Taariikh: Juun 14, 2014



# Sharciga Bankiga Horumarinta iyo Dib-u-dhiska

---

**Taariikhda la ansixiyey  
Juun 10, 2014**

## Tusmo:

Qodobka 1aad: Qeexid .....	3
Qodobka 2aad: Magaca.....	3
Qodobka 3aad: Xarunta Bankiga .....	3
Qodobka 4aad: Ujeeddo .....	3
Qodobka 5aad: Qaab-dhismeedka BDHS .....	4
Qodobka 6aad: Qaab-dhismeedka Raasumaalka Bankiga .....	4
Qodobka 7aad: Iibsiga Saamiga .....	5
Qodobka 8aad: Shahaadada Diiwaan gelinta.....	5
Qodobka 9aad: Kordhin raasumaal .....	6
Qodobka 10aad: Aqbalaadda saamiley cusub .....	6
Qodobka 11aad: Xadaynta Raasumaalka la iibsadey.....	6
Qodobka 12aad: Hawlaha caadiga ah .....	6
Qodobka 13aad: Awoodaha Bankiga.....	7
QODOBKA 14aad: XADDIDAADDA HAWLFULINTA BANKIGA.....	9
QODOBKA 15aad: Haykalka Bankiga .....	9
QODOBKA 16aad: Awoodaha Fadhiga Saamileyda .....	10
QODOBKA 17aad: Fadhiyada Saamileyda .....	10
QODOBKA 18aad: Xaqa Ka Qayb Galka Fadhiga Iyo Codaynta.....	11
QODOBKA 19aad: U Yeeridda 1-Aad Iyo Tan 2-Aad Fadhiga Saamileyda.....	11
QODOBKA 20aad: Guddoomiyaha Iyo Xoghayaha Shirka Saamileyda.....	12
QODOBKA 21aad: Diiwaan- Gelinta Go'aammada Fadhiyada Saamileyda.....	12
QODOBKA 22aad: GUDIGA MAAMULKA (BoD) .....	12
Qodobka 23aad: Xilka Iyo Awoodaha Gudiga.....	13
QODOBKA 24aad: Shirarka Guddiga .....	14
QODOBKA 25aad: Guddoomiyaha Bankiga- Magacaabiddiisa Iyo Inta Uu Xilka Haynayo .....	15
QODOBKA 26aad: Hawlihiisa Iyo Awoodihiisa.....	15
QODOBKA 27aad: Agaasimaha Guud Magacaabidda Iyo Muddada Xilka .....	16
QODOBKA 28aad: Hawlaha Iyo Awoodaha Agaasimaha Guud.....	16
QODOBKA 29aad: Guddiyada Gaarka Ah .....	16
QODOBKA 30aad: Baarayaasha - Magacaabidda Baarayaasha Dibadda.....	17
QODOBKA 31aad: Waajibaadka - Hantidhowrayaashu Waxaay: .....	17
QODOBKA 32aad: Xeerar Kale Duwan Isdiidid .....	17
QODOBKA 33aad: Shaqaalaha Bankiga.....	17
QODOBKA 34aad: Mamnuucid .....	17
QODOBKA 35aad: Adkaynta Sirta.....	18
QODOBKA 36aad: Maamulka Maaliyadda Bankiga Shaabbadda Qalalan .....	18
QODOBKA 37aad: Sanad Maaliyadeed Iyo Aqbalaada Miisaaniyada .....	18
QODOBKA 38aad: Qoondaynta Faa'idada .....	19
QODOBKA 39aad: Go'aannada Shirka Saamileyda Haddii Khasaare Yimaado .....	19
QODOBKA 40aad: Ku Talo Galkii Ugu Danbeeyay BAABI'IN .....	19
QODOBKA 41aad: Qoraalka Af-Soomaaliga Ayaa Rasmi Ah .....	19
QODOBKA 42aad: Dhaqan Gelid.....	19



Sharci Lam. \_\_\_\_\_

Taariikh: \_\_\_\_\_

## Wax ka beddelidda Sharciga Bankiga Horumarinta iyo Dib-u-dhiska

### Qodobka 1aad: Qeexid

HADDII AAN SI KALE LOO DHIGIN

“Guddi” waxaa loo jeedaa ‘Gudiga Maamulka’ (BoD)

“Guddiga” waxaa loola jeedaa ‘Gudiga Wasiirada ee Dawladda Federaalka ee Soomaaliya’

“JFS” Waxaa loola jeedaa ‘Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya’

“Saamileyda” Waxaa loo jeedaa ‘kulanka xubnaha Samileyda BDHS oo sanadlaha ah.”

“Guddoomiye” waa loola jeedaa guddoomiyaha Bankiga

“Shahaado” waxaa loola jeedaa shahaado Bankiga ka diiwaan gashan

“BDHS” waxaa loo jeedaa ‘Bankiga Dibudhiska iyo Horumarinta Soomaalida

### Qodobka 2aad: Magaca

1. Sharcigan waxaa lagu asaasay Bankiga Dib-u-Dhiska iyo Horumarinta Soomaalida (BDHS)
2. Bankigu wuxuu u hawl gelayaa si waafaqsan Sharigan iyo shuruucda kale ee khuseeya.

### Qodobka 3aad: Xarunta Bankiga

1. Xarunta Bankiga waa Muqdisho wuxuuna Bankiga yeelan karaa laamo iyo wakiillo gudaha JFS iyo dibeddaba.
2. Gudiga Maamulka ayaa go’aaminaya halka laga furayo laamaha iyo wakiilada oo ku yaalla gudaha JFS iyo dibeddaba.

### Qodobka 4aad: Ujeeddo

1. Waxaa Bankiga Bartilmaameed u ah inuu kor u-qaado, gacan siiyo, hore umariyo ama casiryeyo mashruuc kasta oo wax soo saar dhanka beeraha, warshadaha, macdanta, dalxiiska, kalluumeysiga, xoolaha, kaabayaasha dhaqaalaha, iyo inuu qaado tallabo kasta oo ku habboon horumarinta dhaqaalaha dalka iyadoo xoogga la saarayo qaybta sida gaarka ah loo leeyahay.

2. In uu Bankigu fududeeyo, dhiirri geliyana qeybta lahaanshaha gaarka ah si ay u abuurmaan shaqooyin iyo dakhli.
3. In uu Bankigu maalgeliyo dibudhiska, dayactirka, dibuhabeynta kaabayaasha dhaqaalaha ee JFS iyo sidoo kale mashaariicda horuumarineed si waafaqsan qorshaha Qaran ee dhaqan-dhaqaale.
4. In uu Bankigu soo bandhigo soona saaro sukuuga iyo damanadaha kale maalgelin awgood, iyo in uu JFS gudaheeda ka hirgeliyo maalgelinta mashaariic waaweyn.
5. In uu Bankigu lacago ka amaahdo He'yadaha dalka, kuwa gobolka, iyo kuwa caalamkaba si waafaqsan mabaadi'ida maalgelinta ee Islaamka.
6. In uu Bankigu maalgeliyo suuqyada hantida raasumaalka, lacagaha, iyo hantida maguurtada ah iyadoo looga gol leeyahay kobcinta hantida raasumaalka iyo wax soo saarka.
7. In uu Bankigu si dhab ah u baaro una qiimeeyo mashaariicda uu maalgeliyey iyadoo laga eegayo tayada xagga farsamada, maaliyadda, iyo dhaqaalaha mashruuca iyo in uusan mashruucu khilaafsaneyn shareecada Islaamka.

### **Qodobka 5aad: Qaab-dhismeedka BDHS**

1. Siyaasadda guud ee BDHS waxaa hagaya oo hoggaaminaya Wasaaradda Maaliyadda ee JFS iyo Bankiga Dhexe uu kamid noqonaya Guddiga Maamulka (BoD).
2. Hay'adihii uu Bankiga Horumarinta deyn ka qabay waxaa deyntooda mas'uul ka ah Wasaaradda Maaliyadda, sidoo kale Shirkadihii iyo Shaqsiyaadkii uu Bankiga siiyey amaah waxaa raadinteeda iyo dabagalkeeda mas'uul ka ah BDHS.

### **Qodobka 6aad: Qaab-dhismeedka Raasumaalka Bankiga**

1. Raasumaalka bilowga ah ee bankigu waa US \$50,000,000 (Konton milyan oo Dollar), kaas oo ka kooban ugu yaraan 51% ay qaadato JFS; ugu badnaan (49%) ka hareyna ay qaataan si wadaag ah maalgeliyaasha soomaaliyeed, Shirkadaha gaarka ah ee caalamiga, iyo Hey'adaha maalgalined.
2. Raasumaalka Bankiga waxaa loo qeybinayaa konton Kun (50,000) oo saami iyadoo saami kasta qiimihiisa uu yahay Kun doolar (US\$1000) oo Mareykan ah.

3. Bankigu wuxuu hawlgelayaa markii uu helo boqolkiiba Shan (5%) raasumaalka guud ee Bankiga.
4. Raasumaalka Bankiga waxaa loo qeybinayaa sidan:
  - a. Shan meelood meel (1/5) waa raasumaalka ay waajib tahay in la bixiyo.
  - b. Shan meelood afarna (4/5) waa raasumaalka laga dalbi karo saamileyda markii loo baahdo.

### **Qodobka 7aad: Iibsiga Saamiga**

1. Saamiyada waxaa lagu iibsanyaa lacag caddaan ah.
2. Iibsiga saamiga wuxuu ansaxayaa oo hirgelayaa marka la bixiyo ugu yaraan boqolkiiba Shan (5%) Raasumaalka Bankiga.
3. Raasumaalka haraaga ku ah saamileyda waxaa loo dalbayaa si waafaqsan shuruudaha iyo qaababka uu dejiyo Gudiga Maamulku.
4. Waxaa jiri doona ogaysiin waqti oo aan ka yarayn saddex bilood oo ay tahay in lagu bixiyo haraaga raasumaalka.
5. Saamile walba waxaa qaan ku ah inuu ku bixiyo raasumaalka uu isku qoray waqtiga loo qabtey (sida ku cad Para 4 ee qodobkan 6aad).
6. Hadii ay dhacdo in saamiluhu uu bixin waayo raasumaalka ku dhiman, Bankigu wuxuu ku soo rogayaa saamilahaasi ganaax lacageed sida waafaqsan qodobada sharcigan.
7. Ganaaxa lacageed Kama badnaan karo boqolkiiba labo (2%) raasumaalka ku dhiman saamilaha muddada ku siman saddexda bilood ee ugu horreysa; muddadaas ka dib, Bankigu wuxuu kordhin doonaa qaddarka lacageed ee ganaaxa hadba sida waafaqsan xeerka ay go'aamiyaan Gudiga Maamulku.

### **Qodobka 8aad: Shahaadada Diiwaan gelinta**

1. Saamile walba waxaa la siinayaa shahaadooyin diiwaan gashan – shahaado kastana waxaay u taagan tahay hal ama in ka badan oo saami.
2. Shahaadooyinkaas waa in lagu muujiyaa lacagta raasumaal ee saamiluhu bixiyay, waana inay saxiixaan labo ka tirsan Gudiga Maamulka, kuwaasoo leh saxiixa idman; isla markaas, waa in ay ka muuqataa shahaadadaas shaabbadda rasmiga ah ee Bankiga.



### **Qodobka 9aad: Kordhin raasumaal**

1. Raasumaalka Bankiga waxaa la kordhin karaa marka ay Saamileydu sidaas go'aansadaan.
2. Saamileydu waa in ay caddeyaan qaddarka lacagta raasumaalka ee la kordhiyey iyo qaabka loo dalbanayo saamiyada cusub ee la kordhiyey.
3. Waxaa saamileyda loo soo bandhigayaa mudnaanta ay ku leeyihiin saamiyada cusub.

### **Qodobka 10aad: Aqbalaadda saamiley cusub**

Aqbalaadda saamiley cusub oo ku timid kordhinta cusub ee raasumaalka waxaa arrinkaas lagu oggolaanaya go'aanka shirka saamileyda, ama kan Gudiga Maamulka, haddii shirka saamileydu arrinkaasi awood u siiyo.

### **Qodobka 11aad: Xadaynta Raasumaalka la iibsadey**

Ma jiraan saamiley ka duwan JFS iyo Bankiga Dhexe oo lahaan Kara in ka badan 5% Raasumaalka la iibsadey ee Bankiga.

### **Qodobka 12aad: Hawlaha caadiga ah**

Iyadoo hawlaha Bankiga aaney ku koobneyn oo kaliya tilmaamaha qodobka 4aad ee sharcigan, waxaa hawlaha Bankiga ka mid noqonaya:

1. Bankigu wuxuu guud ahaan hawlihiisa shaqo waafajinayaa kuwa ay JFS mudnaanta kowaad siisay sida dhaqaalaha iyo horumarinta arrimaha bulshada. Waxaa kale oo uu wadashaqeyn la yeelaneynaa hay'adaha kale oo ku hawllan arrimaha dib-u-dhiska iyo horumarinta.
2. Bankiga wuxuu maalgelintiisa tixgelin gaar ah siinayaa horumarinta kheyraadka dabiiciga ah ee Soomaaliya sida Beeraha, Kalluumeysiga iyo Xoolaha, iyadoo xooqa la saarayo wax soo saarka iyo hubinta cuntada.
3. Wuxuu Bankigu ku talaabsanaya wax qabad kala gedisan si uu kor ugu qaado raasumaalka, u yareeyo khatarta, si uu ugu fidiyo faa'iidooyinka maalgelinta qaybaha kala duwan ee dhaqaalaha.

4. Wuxuu Bankigu gacan ka geysanayaa iskaashi dhexmara maalgeliyaasha dalka iyo kuwa shisheeye taasoo dhiirigelineysa imaanshaha dalka raasumaal caalami ah, mid farsamo (technology) iyo xirfad maamul.
5. Wuxuu Bankigu fududeynayaa aqoonta farsamada, ka qeybgalka dhaqaalaha, iyo/ama damaanad uu siiyo maalgeliyaasha shisheeye.
6. Bankigu wuxu ku baahin doonaa hawlahiisa shaqo gobollada iyo degmooyinka JFS.
7. Intuu hawlahiisa shaqo ku jiro Bankigu, wuxuu hubaal ka dhigayaa, isagoo raacaya amarka Gudiga, inuu faa'ido macquul ah ka helo maalgelinta uu sameeyo, si uu u daboolo kharashyadiisa maamulka, inuu kaydkiisa kordhiyo iyo inuu isku dheellitiro maalgashiyada uu sameysto, hadba sida uu Gudiga Mamuulku go'aamiyo.
8. Gudiga Maamulka (BoD) waxaay go'aaminayaan amaahaha, muddadooda, caddaddooda, faa'iidada iyo khidmadaha la saarayo maalgelinta Bankigu sameeyo.

### **Qodobka 13aad: Awoodaha Bankiga**

1. Bankigu wuxuu yeelanayaa awoodaha uu u baahanyahay oo dhan si uu u hirgeliyo ujeedooyinkiisa hey'adeed sida ku xusan qodobka afaraad (4) iyo kan kow iyo tobanaad (11) ee sharcigan.
2. Iyadoo aan wax loo dhimayn sida kor ku xusan, Bankigu wuxuu ku talaabsan karaa hawlaha soo socda:
  - a. Falal ganacsi oo la xiriira amaahaha iyo damaanadqaadka:
    - I. Bixinta Amaahaha
    - II. Wuxuu uruurinayaa oo la tacaalayaa sukuuk (bonds) loo xilsaarey ama isagu leeyahay, sidoo kale qaansheegad kasta oo lagu sheegto Bankiga, iyo inuu tallaabo sharci ah ee hey'adeed ka qaado waxaa khuseeya uruurinta noocyada qaansheegadka iyo sukuukta (bonds).
      - I. Sameynta, ku biiridda iyo ka qeyb qaadashada ururro ama kooxo maaliyadeed.
      - II. Asaasidda Amaana hayayaal maaliyadeed oo soo saara saamiyada caadiga ah, ama kuwa gaarka ah, shahaadooyinka ama waraaqo u taagan saamiyada ama



raasumaal caddaan ah, iyo nidaaminta, ka qeybgelidda maamulkooda iyo soo saaridda, lahaanshaha, ama wareejinta saamiyada caadiga ah iyo kuwa gaar ah.

**III.** Diyaarinta, dhiirrigelinta ama ku dhaqaaqidda ka qayb-galka shirkado noocwalba ah; qaadashada, hayshasada ama wareejinta saamiyada, iyo sukuukta ama hantida shirkadahaasi.

**IV.** Kala shaqeynta shirkadaha maalgelinta hawlahooda ganacsi, isagoo gadanaya, iibinaya saamiyada, Sukuuk (Bonds) iyo hanti kasta oo Shirkadu damiinatay oo ka abuurantay ama ka hawlgasha JFS gudaheeda, ama hanti kasta oo Dawladda ama hey'adaheedu damiinteen.

**V.** Dhisidda, wax ka bedelidda ama dayactirka dhismayaasha iyo wax walba oo Bankiga shaqadiisa khuseeya.

**VI.** Heshiisyada iibka, kireynta isku beddelashada iwm hantida guurtada iyo ma guurtada ee Bankiga.

b) Amaah Qaadasho:

i. Qaadashada amaahaha ama gelista heshiisyada deymaha JFS gudaheeda iyo dibeddeeda, iyadoo lacagtu noqon karto midda waddanka ama tan shisheeyaha.

ii. Xaqiijinta in amaahahaasi saldhig dammaanad oo ma guurto ah leeyihiin, gudbinta waraaqaha kolsoonida ee lahaanshaha iyo rahan gelinta hantida saldhigga u ah amaahaha Bankigu bixiyo.

iii. Soo saarista, sameynta, aqbalidda, waafaqididda, fulinta, iibinta, ama siyaasad u dejinta Jeegagga, kambiyaalayaasha, dammaanad qaadyada, sukuuk iyo caddaymo kale oo deyn lagu galay.

iv. Soo saarista iyo/ama xaqiijinta waraaqaha kalsoonida (letter of credit) iyo waraaqaha ballan qaadka (letter of Commitment).

I. Falal kale

a. In Bankigu ka shaqeeyo sidii looga diiwaan gelin lahaa iyo sidii looga aqoonsan lahaa dalalka shisheeye.

b) In uu qaado tallaabo kasta uu ku xaqiijin karo sidii uu u heli lahaa mudnaan la mid ah kuwa ay leeyihiin Bankiyada kale ee caalamka uu la falgalayo.

## **QODOBKA 14aad: XADDIDAADDA HAWLFULINTA BANKIGA**

Bankiga markuu hawlihiisa fulinayo wuxuu ku khasbanyahay xaddidaadaha soo socda:

- a) Amaahaha uu Bankigu bixinayo waa in aysan dhaafin 10 jibbaar Raasumaalkiisa iyo kaydkiisa caadiga ah marka la isu geeyo.
- b) Bankigu ma bixin karo amaah muddadeedu ka badan tahay 10 sano.
- c) Bankigu waa inaanu hal mushruuc ku bixin amaah ka badan  $\frac{3}{4}$  Raasulmaalkiisa guud, isla markaasna waa in dhinaca amaahda qaadanaya uu bixiyo  $\frac{1}{4}$  raasumaalka mashruuca inta aan amaahda la siin.
- d) Wadarta Maalgelinta, oo ay ku jiraan dammaanadaha uu Bankigu siiyey shirkad qura, kama badan karto 10% isku darka raasumaalka la bixiyey (paid in capital) iyo keydka Bangiga.
- e) Bankigu kagama qayb gali karo shirkad wax ka badan 5% isugeynta Raasumaalkiisa la baxshay iyo keydkiisa.
- f) Bankigu kagama qaybgali karo hal shirkad wax ka badan 49% Raasumaalka la baxshay ee shirkadda.
- g) Wadarta guud ee maalgelin raasumaal uu Bankigu kaga qayb gelayo shirkado kale kama badnaan karto 50% raasumaalka la baxshey iyo keydka Bankiga.
- h) Bankigu dadweynaha kama aqbali karo dhigasho iyo kayd lacageed oo muddadoodu ka yar tahay 24 bilood.

## **QODOBKA 15aad: Haykalka Bankiga**

Haykalka Bankiga wuxuu noqonayaa:

1. Saamileyda.
2. Gudiga Maamulka (BoD).
3. Guddoomiyaha.
4. Agaasimaha Guud ee Horumarinta.
5. Agaasimaha Guud ee Dib-u-dhiska.
6. La taliyaasha iyo qareenka.
7. La taliyeyaasha xagga Shareecada.
8. Agaasimayaal waaxeedyo.
9. Madaxda Qaybaha



### **QODOBKA 16aad: Awoodaha Fadhiiga Saamileyda**

1. Waxaa waajib ku ah Saamileyda in ay ku diiwaan geliyaan magacyadooda iyo taariikhda ka mid noqoshada Saamileyda Buugga diiwaangelinta Saamileyda si ay u gutaan waajibaadkooda.
2. Samileydu waxaay:
  - a. Ansixinayaan xisaab xirka sanadka iyo Caddeynta Faa'iidada iyo Khasaaraha. (Balance Sheet and Profit and Loss Statement).
  - b. Dooranayaan xubnaha ka mid noqonaya Gudiga Maamulka (BoD).
  - c. Magacaabayaan sanad walba hal Baare ama in ka badan oo xirfadlayaal ah kuwaasoo baaraya xisaabaadka Bankiga si ay u xaqiijiyaan Xisaab Xirka Sanadka iyo Caddeynta Faa'iidada iyo Khasaaraha.
  - d. Jaangoonayaan mushaharooyinka Guddoomiyaha, Xubnaha Gudiga Maamulka (BoD) iyo Agaasimaha Guud.
  - e. Go'aaminayaan in la soo saaro sukuuk (Bonds), kordhinta Raasumaalka Bankiga iyo oggolaanshaha Saamilelayaal cusub.
  - f. Go'aaminayaan tillaabooyinka la qaadayo sida uu qabo qodobka 25 ee Sharcigan.
  - g. Go'aan ka gaarayaan arrimaha kale oo dhan oo Sharcigani u oggolaanayo ama talo soo jeedinta Gudiga Maamulka ka dib.
  - h. Wax ka beddelayaan Sharcigan, markuu Gudiga Maamulku u soo gudbiyo.

### **QODOBKA 17aad: Fadhiyada Saamileyda**

U yeeridda Saamileydu waxaay saldhig u noqoneysa fadhiga Saamileyda.

1. U yeeridda fadhiga Saamileydu wuxuu ku qabsoomi karaa si waafaqsan Sharcigan. Fadhiiga saamileyda waxaa loo yeeri karaa ugu yaraan sanadkiiba hal mar, waliba afarta bilood ee u horreysa sanadka gudahiisa, maaddaama ay yihiin bilihii ku xigeysa xisaab xirkii sanadkii hore, iyo markasta oo Guddoomiyaha, Gudiga Maamulka (BoD) ama 1/3 Saamileyda iska leh ugu yaraan 1/5 Raasumaalka.
2. Marka shir loogu yeerayo Saamileyda, Guddoomiyuhu waa inuu 30 maalmood ka kor waqtiga shirka loo qoondeeyey qoraal ku wargeliyaa xubin walba oo ka mida Saamileyda, isagoo ku caddeynaya taariikhda, saacadda, goobta iyo Ajendaha shirka.

3. Shirku wuxu ku ansixi karaa markay shirka joogaan 50% lagu daray hal tirada guud ee Saamileyda.
4. Maalin kale iyo waqti kale ayaa loo qabanayaa shirka labaad, haddii la waayo tirada uu shirka koowaad ku qabsoomikaro.

### **QODOBKA 18aad: Xaqa Ka Qayb Galka Fadhiga Iyo Codaynta**

1. Marka fadhi la qabanayo waxaa xaq u leh inuu ka qaybgalo xubinta Buugga saamileyda isku qortay 15 beri ka hor waqtiga shirka loo ballamay.
2. Saamileydu waxaay shirka uga qayb geli karaan oo u codeyn karaan shakhsiyan, ama wakiil ayaa meteli kara. Wakillka waa in warqad qoraal ah lagu wakiishaa, taasoo lagu xafidayo Bankiga. Shaqaalaha Bankigu wakiil uma noqon karaan Saamile.
3. Si kastaba ha ahaatee, Guddoomiyaha Bankiga ayaa hubinaya sax ahaanta wakiilnimada iyo guud ahaan xaq u yeelashada ka qaybgalka shirka iyo codeyntaba.
4. Guddoomiyahu wuxuu u xilsaari karaa hawlaha ku xusan farqadda 3aad ee qodobkan xubin kasta oo ka tirsan Gudiga Maamulka.

### **QODOBKA 19aad: U Yeeridda 1-Aad Iyo Tan 2-Aad Fadhiga Saamileyda**

1. Shirka saamileydu wuxuu ansaxayaa marka ay joogaan xubno hantay ugu yaraan 2/3 Raasumaalka saamiyada.
2. Isu imaanshiyaha labaad wuxuu ansaxayaa isagoo aan loo eegeyn tirada saamiyada ay xubnuhu matalayaan.
3. Go'aannada ay saamileydu ku gaaraan fadhigan wuxuu ku ansaxayaa aqlabiya dheeri ah:
  - i. Haddii go'aannadaasi aaney ahayn kuwo khuseeya kordhinta Raasumaalka Bankiga, aqbalaadda saamile cusub, sharci beddelid, soo saaridda sukuukyada, kuwaas oo dhammaantood ku ansaxaya inay shirka fadhigaan xubno metelaya waxaan ka yarayn 2/3 Raasumaalka Bankiga.
4. Saamile walba wuxuu hal cod ku yeelanayaa halkiisa saami oo keliya. Guddoomiyaha iyo xubnaha Gudiga Maamulku (BoD) kama qayb gelayaan go'aan qaadashada ay dano gaar ah ku leeyihiin.



5. Saamileydu waxaay ku qasbanyihiin go'aan kasta oo ka soo baxa fadhiga saamileyda oo waafaqsan sharcigan ama xeerarka.
6. Haddii laga reebo doorashada Gudiga Mamulka, oo noqoneysa qarsoodi, codbixinta saamileydu waa magac yeeris, haddii aan shirka lagu go'aansan sidan si ka duwan.

#### **QODOBKA 20aad: Guddoomiyaha Iyo Xoghayaha Shirka Saamileyda**

1. Shirka saamileyda waxaa guddoominaya Guddoomiyaha Bankiga, hadduu maqan yahayna Agaasimaha Guud.
2. Shirka fadhiyada Saamileydu waa inuu yeeshaa Xoghaye, kaasoo haynaya diiwaanka shirarka, haddii aan guddoomiyuhu si kale amrin.
3. Guddoomiyuhu inta shirka fadhida, mid iyo ka badanba, wuxuu ka cosdan karaa inay gacan siiyaan xilliga cod la qaadayo.

#### **QODOBKA 21aad: Diiwaan- Gelinta Go'aammada Fadhiyada Saamileyda**

1. Waa in buug loogu talo galay lagu diiwaan geliyaa go'aannada ka soo baxa fadhiyada saamileyda. Diiwaangelinta waxaa ka mid noqonaya qoraal shireed (minutes) laga sameeyo fadhi walba, kaas oo ay saxiixayaan Guddoomiyaha iyo Xoghaya, Bankigana lagu haynayo.
2. Waa loogu dari karaa saamileyda qoraal shireedka (minutes) hadalladooda oo kooban haddii ay codsadaan.
3. Go'aammada ka soo baxa shirarka saamileyda, iyadoo kooban, iyo xisaab xirka sanadka iyo caddaynta fa'iidada iyo khasaaraha, marka ay ansixiyaan Saamileydu, waa in lagu daabacaa faafinta Rasmiga ah.

#### **QODOBKA 22aad: GUDIGA MAAMULKA (BoD)**

##### **DOORASHADA IYO MUDDADA XAFIISKA**

1. Gudiga Maamulku kama yaraan karo 5 kamana badan karo 9 xubnood.
2. Gudiga waxaa lagu dooranayaa fadhiga saamileyda iyadoo loo tixgelinayo saamiyada ay leeyihiin, waxaana saldhig u ah:

Ugu yaraan 10% oo saami ee raasumaalka Bankiga ayaa loo baahan yahay si loogu yeesho xaq xubin Guddiga Maamulka.

1. Gudiga Maamulka, oo loola jeedo kuwa ku xusan Para (2) ee qodobkan, waxaa lagu dooranayaa fadhiga ugu horreeya ee shirka saamileyda-
2. Muddo hawleedka Goluhu kama badan karo labo sano.
3. Xubinta Gudiga ee fasax la'aan kaga maqnaata shirarka lix bilood ama ka badan waxaa loo qaadanayaa inay bannayasay xafiiska Gudiga.
4. Haddii xubin ka mida Goluhu sabab kasta, oo ka baxsan tan kore, uu gudan waayo xilkiisa ka hor inta aaney dhammaan muddada uu xilka hayn lahaa, Guddoomiyaha ayaa magacabaya xubin cusub oo xilka sii hayaa ilaa fadhiga Saamileyda ee xiga.
5. Xubinta la magaacabay ama dib loo doortay waxaay xilkaas haynaysaa muddada ka harsan waqtiga.

### **Qodobka 23aad: Xilka Iyo Awoodaha Gudiga**

1. Gudiga Maamulku, iyadoo higsanaya ka guul gaaridda ujeedooyinka Bankiga, waxaay isticmaalayaan awoodhooda oo dhan marka laga reebo kuwa sharciga iyo sharci- hoosaadyadu u gaar yeelayaan shirka saamileyda.
2. Iyadoo aan lagu ekeenayn guud ahaan inta kore, Goluhu wuxuu:
  - a. Go'aaminayaa bixinta haraagii raasumaalka ee la isku qoray sida waafaqsan qodobka (6) para (2) iyo (3) iyo arrinta u warejinta saamiyada loo wareejinayo saamileyda cussub, ku tallaabsashada ficilka ku habboon sida uu qeexayo qodobka (13), Para (2). Dadka wadaaga hal saami, waxaay wadajir mas'uul uga yihiin bixinta qaanta saamiga.
  - b. Go'aaminayaa habka loo maamulayo wada xaajoodka waraaqaha lacagta (negotiable instruments).
  - c. Talo ka soo jeedinayaa arrimaha rahanka.
  - d. Go'aaminiyaa habka waraaqaha lacagata (negotiable instruments) loo saxiixayo, loo soo saarayo, loo aqbalayo, loo wareejinayo ama loo fulinayo.
  - e. Soo roogayaa mabaadii'da guud ee la xiriirta amaah bixinta iyo amah qaadashada oo Bankigu ku talaabsanayo.
  - f. Furiyaa Laamo, wakiillo iwm gudaha JFS iyo dibeddaba.



- g. Haynayaa buugagga xisaabaadka iyo aqbalidda qeexidda xisaab xirka sanadka iyo caddeynta faa'iidada iyo khasaaraha iyo weliba soo jeedinayaa in loo gudbiyo Saamileyda.
- h. Magaacaabayaa xubnaha Guddiga ka talo bixinta Shareecada iyo qeexidda awoodohooda.
- i. U wakiilanayaa awoodohooda Guddoomiyaha Bankiga, Agaasimaha Guud, siinta oggolaansho iyo awoodo dhinac saddexaad, sida magacaabidda qareen sharci oo Bankiga loo sameeyo.
- j. Asaasayaa Guddiyo gaar ah loona qeexo hawlohooda iyo awoodohooda.
- k. Go'aan ka qaadnayaa rahamadda deymaha oo dhan ama lifaaqyada, ama hawlaha dammaanadaha oo arrimahaas la xiriira.
- l. Oggolaanayaa Agaasime inuu noqdo Agaasime xafiis oo uu aqbalu inuu mushahar ka qaato shirkad kasta oo Bankigu dano ka lahaan karo.

#### **QODOBKA 24aad: Shirarka Guddiga**

1. Guddoomiyaha ayaa iclaaminaaya shirka Gudiga Maamulka, waxaana lagu qaban karaa xarunta Bankiga amase meel kaleba, isagoo qoraal ku ogeysiinaya mid walba, labataan beri ka hor xilliga shirka loo ballamay iyo arrimaha laga wada hadlayo.
2. Iyadoo ay jirto ku talo galka para (1) ee sharcigan, haddana shirka Gudiga waxaa la isugu yeeri karaa war gelin ku siman 10 beri ka hor maalinta shirka loo ballansan yahay.
3. Shirka Gudiga waxaa guddoomiyana Guddoomiyaha, hadduu maqan yahayna Agaasimaha Guud.
4. Xubin Gudiga ka tirsan markuu maqan yahay, wuxuu codkiisa u wakiilan karaa xubin kale.
5. Shirka Goluhu wuxu ka ansaxayaa marka ay fadhiga joogan intooda badan shakhsiyan ama wakiilladooda.
6. Codaynta ay go'aan ku qaadayaan xubnaha Goluhu hadii ay tiro siman noqdaan, codka Guddoomiyaha ayaa noqonaya kan wax go'aamiya.
7. Haddii xubin ka tirsan Goluhu uu dan ka duwan ka leeyahay isagu/iyadu ama cid uu wakiil ka yahay, danaha Bankiga ee fadhigaas looga hadlayo, waa uu ka gaabsanayaa ka hadalka iyo cod bixinta arrintaas la xiriirta. Haddii uu sidaas yeeli waayo waxaa

dushiisa noqonaya wixii dhibaato ama khasaare soo gaara Bankiga oo ay arrintaasu keento.

8. Go'aammada uu Goluhu gaaro waa in lagu qoraa bug gaar ah qaab shir-xafiiseed, laga saxiixaa Guddoomiyaha iyo Xoghayaha, laguna xafidaa Bankiga.
9. Guddiga wuxuu shirayaa ugu yaraan lixdii biloodba mar.

### **QODOBKA 25aad: Guddoomiyaha Bankiga- Magacaabiddiisa Iyo Inta Uu Xilka Haynayo**

1. Guddoomiyaha Bankiga waxaa lagu magacaabayaa Dekreeto ka soo baxda Madaxweynaha Jumuuriyadda Federaalka Soomaaliya, markii Wasiirka Maaliyaddu uu talo ku soo jeediyo, lana soo mariyo Gudiga Wasiirrada.
2. Wuxuu jagadaas haynayaa 5 sano, dib ayaana loo magacaabi karaa. Haddii waqtiga uu xilka haynayo dhammaado sanadka socda dhexdiisa, wuxuu xilka sii haynayaa ilaa laga ansixinayo isku dheellitirka xisaabaadka, lana soo saarayo faa'iidada iyo khasaaraha Bankiga ee sanadkaas iyo waliba inta qofkii xafiiska loo magacaabay kala wareegayo.

### **QODOBKA 26aad: Hawlihiisa Iyo Awoodihiisa**

1. Guddoomiyuhu wuxuu noqonayaa madaxa Guddiga fulinta arrimaha Bankiga, wuxuuna mas'uuul ka yahay guud ahaan Maamulka Bankiga, haddii sharcigan iyo xeerar kale, oo dib laga soo saaro go'aannada shirka saamileyda iyo kan Guddiga aaney si kale u dhigin, wuxuu masuul ka yahay Guud ahaan Maamulka Bankiga.

Guddoomiyuhu wuxuu:

- a) Bankiga sharci ahaan u metelayaa xiriirka dhinacyada saddexaad;
- b) U yeerayaa oo shir-guddoominayaa fadhiyada Saamileyda;
- c) U yeeraya oo shir-guddoominayaa fadhiyada Gudiga Maamulka;
- d) Siinayaa awoodo iyo wakaalado dhinacyo saddexaad, kuwo xataa ka baxsan kuwa Bankiga si waafaqsan sharciga iyo xeer-hoosaadyada; wuxuu kaloo dad u oggolaan karaa soo ururinta lacagayow iyo bixinta warqad lacag-qabasho (receipts).



### **QODOBKA 27aad: Agaasimaha Guud Magacaabidda Iyo Muddada Xilka**

2. Agaasimaha Guud waxaa lagu magacaabayaa qaraar (Decree) Madaxweynaha JFS, markii uu talo soo jeedin ka helo Wasiirka Maaliyadda, lana soo mariyo Gudiga wasiirrada.
3. Wuxuu xilka xafiiska haynayaa 3 sano, dib ayaana loo magacaabi karaa. Haddii xilkiisu ku eg yahay sanadka oo aan dhammaan, wuxuu xilka haynayaa ilaa iyo inta xisab-xirka sanadka la samaynayo, lana soo saarayo faa'idada iyo khasaaraha Bankiga iyo ilaa iyo inta cid kale xafiiska kala wareegeyso.
4. Haddii uu si ku meel gaar ah xafiiska uga maqnaado ama wax ku dhacaan, waxaa beddelaya, si ku meel gaar ah, qofka uu Guddoomiyuhu u soo magacaabo xafiiskaas.

### **QODOBKA 28aad: Hawlaha Iyo Awoodaha Agaasimaha Guud**

1. Agaasimaha Guud wuxuu mas'uul ka yahay dhammaan shaqada maalinlaha ee maamulka, hawlfulinta Bankiga iyo kormeerka shaqaalaha Bankiga, isagoo shaqadiisa uu ku kormeerayo Guddoomiyaha Bankiga.
2. Wuxuu qabanayaa:
  - a. Wuxuu ka qaybgelayaa fadhiyada Gudiga (BoD), laakiin xaq uma lahan inuu codeeyo.
  - b. Fulinta go'aannada Gudiga (BoD), sida Guddoomiyuhu u jiheeyo.
  - c. Siinayaa hawl-fulinta Bankiga waxaa loo baahan yahay, wuxuuna amrayaa kharash bixinta arrimahaas la xiriirta.
  - d. Waa madaxa shaqaalaha Bankiga wuxuuna qaadayaa tallaabo kasta oo xeerka iyo nidaamka Bankigu u oggolyahay.

### **QODOBKA 29aad: Guddiyada Gaarka Ah**

1. Guddiga wuxuu awood u leeyahay inuu dhiso hal ama ka badan oo guddiyo gaar ah kuwaasoo maaamulaya lacago gaar ah iyo qoondemo si gaar ah ay ugu deeqeen dowlado shisheeye ama hay'ado, loolana jeedo qaybo gooni ah ee dhaqaalaha.
2. Guddiyada gaarka waxaay ka koobnaan karaan Guddoomiyaha, Agaasimaha Guud, mid ama ka badan Agaasimayaasha, waxaana magacaabaya Guddiga

Agaasimayaasha iyo xubno kale haddii ay duruufo jiraan, sida heshiisyo dowladda ama hay'ado.

### **QODOBKA 30aad: Baarayaasha - Magacaabidda Baarayaasha Dibadda**

Shirka saamileyda waxaa sanadwalba laga magacaabayaa mid ama ka badan hantid dhowre u qalma barista (oo halka loogu yeerayo Hantidhowre), si uu u baaro xisaabaadka Bankiga iyo caddeynta faa'iidada iyo khasaaraha Bankiga.

### **QODOBKA 31aad: Waajibaadka - Hantidhowrayaashu Waxaay:**

- a) Eegayaan sida xisaabaha iyo maamulku u shaqeynayaan iyo sida arrimaha maaliyaddu u fuleen, si loo xaqiijiyo in wax walba ay u falgaleen si waafaqsan xeerarka iyo nidaamka sharcigu qeexayo.
- b) Caddaynayaan saxnimada miisaaniyadda iyo Caddeynta faa'iidada iyo khasaaraha.
- c) Hubinayaan lacagta caddaanka ah ee gacanta lagu hayo iyo Raasumaadka iyo dammaanadaha Bankiga.

### **QODOBKA 32aad: Xeerar Kale Duwan Isdiidid**

Guddoomiyaha Bankiga, Agaasimaha Guud iyo Guddiga (BoD) waxaa ka reeban shaqo kasta iyo wax kasto lid ku ah ama aan la socokarin waajibaadka shaqo ee u hayaan bankiga.

### **QODOBKA 33aad: Shaqaalaha Bankiga**

1. Shaqaalaha Bankiga derejo kasta ha ahaadee waa in tartan imtixaan la geliyaa marka shaqaale la doonayo in la qaato. Waa iney soomaali yihiin leeyihiina aqoonta iyo khibradda looga baahan yahay.
2. Ayadoo Para (1) ee qodobkan uu taangan yahay Bankiga wuxuu qaadan karaa khubaro Ajnabi/Somali ama kuwo uu ka soo amaahdo.
3. Bankigu wuxuu heshiis shaqo oo waqti cayiman ah la geli karaa shaqaale shisheeye ah.

### **QODOBKA 34aad: Mamnuucid**

Guddoomiyaha, Agaasimaha Guud, saraakiisha kale iyo shaqaalaha Bankigu ma qaban karaan shaqo kale, sida ganacsi, warshado, dhaqdhaqaaa maaliyadeed oo aan ka ahayn inay jaamacad wax ka dhigaan.



### **QODOBKA 35aad: Adkaynta Sirta**

Guddoomiyaha, Agaasimaha Guud, Guddiga Maamulka (BoD), shaqaalaha iyo qofkasta oo hawl u fulinaya Bankiga ma gudbin karo xog ku saabsan hawsha uu gacanta ku hayo ama uu si kale ku ogaaday, haddii aan faxas looga helin qofka awoodda u leh.

### **QODOBKA 36aad: Maamulka Maaliyadda Bankiga Shaabbadda Qalalan (The Seal)**

Guddiga (BoD) waa inuu xafidaa shaabbadda qalalan (seal), taasoo isticmaalkeedu gaar u yahay awood ahaan Guddiga (BoD) waana Xubin Guddiga saxiixaa wax kasta oo shaabadda lagu dhejinayo.

### **QODOBKA 37aad: Sanad Maaliyadeed Iyo Aqbalaada Miisaaniyada**

1. Sanad maaliyadeedku wuxuu bilowsaa 1da Jannaayo waxuuna ku dhammaadaa 31-ka December ee sanad walba.
2. Afarta bilood oo ugu horreysa sanad maaliyadeedka Guddiga waa iney oggolaadaan isu Miisaaniyadda iyo caddeynta faa'iidada iyo khasaaraha sanadkii la soo dhaafay. Xisaab xirkaas waa iney la socdaan warbixino caddeynayaa fal xisaabeedkii sanadka oo dhan.
3. Xisaab xirka maaliyadeed waa iney si cad oo sugan uga muuqdaan caddeynta faa'iidada iyo khasaaraha.
4. Guddiga waa iney u gudbiyaan Hanti dhowrayaasha xisaab-xirka sanad maaliyadeedka iyo caddeynta faa'idada iyo khasaaraha iyo wixii kale oo warbixin iyo caddeymo ah, kuwaasoo si deg deg baaris ugu sameeynaya kadibna warbixin ka diyaarinaya.
5. Nuqul laga sameeyey xisaab-xirka iyo caddeynta faa'iidada iyo khasaaraha oo ay ku lifaaqan yihiin warbixinta Guddiga iyo Hantidhowrayaasha waa in laga helaa xarunta Bankiga 15 berri ka hor inta aan saamileydu shir isugu iman- (eeg qodobka 16 ee sharciga). Dhammaan saamileydu waxaay xaq u leehihiin iney indha indheeyaan dokumentigaas ama ay nuqul ka heli karaan.
6. Guddiga waa in ay misaaniyad sanadeed ku talo gal ah oggolaadaa sanadka soo socda ugu dambeyn 31 December ee sanad walba, iyadoo ku muujinaya qiyaasta dakhliga iyo kharashka Bankiga.

### **QODOBKA 38aad: Qoondeynta Faa'idada**

Shirka saamileyda, oo oggolaanaya xisaab xirka iyo caddeymaha faa'idada iyo khasaaraha, waa iney go'aamiyaan qoondeynta faa'idada, iyagoo ku saleynayaa mabaadii'da soo socda:

- a) In aan ka yarayn 25% waa in loo qoondeeya kayd (Reserve).
- b) Inta hartay loo qaybiyaa sida lagaga go'aamiyo shirka saamileyda.

### **QODOBKA 39aad: Go'aannada Shirka Saamileyda Haddii Khasaare Yimaado**

1. Haddii xisaab xir sanadeedka uu ka muuqdo khasaare gaarsiisan kale bar Raasumaalka Bankiga Guddiga wuxuu dalbanayaan in saamileydu shir isugu yimaadaan si ay u go'aamiyaan:
  - a. In khasaaraha Bankiga la hagaajiyo ayadoo la kordhinaayo Raasumaalka.
  - b. In Raasumaalka laga dhimo inta khasaaruhu la egyahay, ama
  - c. In Bankiga la xiro.
2. Haddii saamileydu ay ku heshiiyaan iney Bankiga xiraan waa in go'aankaas Dowladda la gaarsiiyo.

### **QODOBKA 40aad: Ku Talo Galkii Ugu Danbeeyay BAABI'IN**

Wax ka beddelka wuxuu saameynayaa Sharciga lam. 18 ee 14 Ogoosto 1963, Sharciga Lam. 27, 26 Nofeembar 1968, Sharciga Lam. 25, 30 Apriiil 1970 iyo Sharci kasta oo ka horjeeda, ama, aan la jaan-qaadi karin sharcigan waa la buriyey.

### **QODOBKA 41aad: Qoraalka Af-Soomaaliga Ayaa Rasmi Ah**

Haddii afafka sharcigani ku qoran yihiin is khilafaan waxaa sarreynaya kan ku qoran af-soomaaliga.

### **QODOBKA 42aad: Dhaqan Gelid**

Shacigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JFS laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah (official Bulletin)

Muqdisho-----